Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 6aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2018**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2018**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# SANADKA

# 2018

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 045** Taariikh: 20/09/2018

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixinta Siyaasadda Istiraatiijiyadda WACYI-GELINTA QARANKA

***Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99[aad] , (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100[aad] , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dal-xiiska.

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.54.09.18** ee **20/09/2018** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyigelinta Qaranka**" oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyi-gelinta Qaranka.

### *Wuxuu Meel-mariyey:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.54.09.18** ee 20/09/2018, kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyigelinta Qaranka**" oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

### Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Siyaasadda Istiraatiijiyada Wacyi-gelinta Qaranka.

### Qodobka 3aad

Siyaasadda Istiraatiijiyadda Wacyi-gelinta Qaranka, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/397/2018
TAARIIKH: 23/9/2018
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**1.0 HORDHAC** Soomaaliya , waa waddan ay dadkiisu yihiin bulsho afmaal ah, oo warbaahinta aad u daneeya, waxaana ku yar qorista iyo aqrinta. Waxaa u badan bulshada in ay wax dhagaystaan in ka badan aqrinta iyo qorista. Badanaa go'aanada ay qaataan, waxay ku xiran yihiin waxa ay ka maqlaan aaladaha wax la isugu gudbiyo sida Idaacadaha iyo Tv-yada.

Ku dhowaad soddon sano kadib, oo dalka uu soo maray colaado wajiyo badan, sida kuwo qabiil ku saleysan, xagjirnimo diimeed, faragalin shisheeye iwm, ayaa dhallinyarada Soomaaliyeed, lagu qiyaasay 75% shacabka Soomaaliyeed, ayaan fursad u helin fahamka hanmaanka dowladnimo iyo nabad ku wada noolaanshaha. Tiro badan, oo ka mid ah ma helin waxbarasho tayo leh iyo fursado shaqo.

Duruufahaas, ayaa keenay in bulshada Soomaaliyeed ay u nuglaato argagixisada, qabyaaladda, marinhabaabinta iyo kala qeybsanaanta.
Waxay arrintan caqabad ku noqotay is aaminka dawladda iyo dadweynaha, taasoo sida kaliya ee lagu daweyn karo ay tahay in wax laga badelo sida ay u fakaraan bulshadu.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay leedahay Wasaarad Warfaafin, oo mas'uul ka ah wacyigalinta dadweynaha, adeegsanaysana qeybaha kala duwan ee warbaahinta dalka oo ay iyadu mas'uulka ka tahay.

Haddaba, Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, iyadoo ka duuleysa xaaladaha aan kor ku xusnay, isla markaana maskaxda ku heysa ku talogalka qaran ee La dagaalanka argagixisada, dib u eegista dastuurka, in doorasho qof iyo cod ah la gaaro sanadka 2021 iyo qorshayaal kaleba, waxay soo gudbineysaa Qorshe Qaran, oo lagu wacyigeliyo qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed, kaasoo ku eg 2021.

Dowladda Federaalka, ayaa iska leh hogaanka iyo meel marinta istaratiijiyadda wacyigelinta qaran. Madaxda sare ee dowladda, waxaa saaran mas'uuliyadda ugu weyn ee hirgelinta Istaraatiijiyaddan.
Wasaaradda Warfaafintu, waxay leedahay doorka xiriirinta iyo qiimeynta ayadoo kaashaneysa wasaaradaha heer Maamul Goboleed.

Istaratiijiyaddan waxay aqoonsanaysaa doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin wacyigelinta Ururada Bulshada iyo saxaafadda madaxa bannaan, oo lagu dhiiri galinayo siday doorkooda muqadaska ah u qaadan lahaayeen.

Taabo gelinta Istaraatiijiyadda Wacyigelinta Qaran, waxay u baahan tahay qoondo maalgelin dowladeed. Wasaaradda Warfaafintu dalbanaysaa in wacyigelinta lagu daro arrimaha doorka u ah xasilinta iyo horumarinta dalka iyo in loo sameeyo qoondo miisaaniyadeed.

Hirgelinta istaratiijiyadu, waxay mudnaanta kowaad siinaysaa ololayaasha muhiimada goonida ah u leh dowladda. Olole kasta wuxuu yeelanayaa istaraatiijiyadiisa wuxuuna xambaarayaa fariimaha qaaska u ah, marka madaxda qaranku iclaamiso kuwa ahmiyada goonida ah u leh.
Olole kasta waxaa Wasaaradda Warfaafintu ay kala shaqeyneysaa wasaaradda uu sida gaarka ah u quseeyo wax-qabadkeeda.

Doorka Wasaaradda Warfaafintu waa qaabeynta ololeyaasha iyo taakulada warbaahineed ee uu mid kastaa u baahan yahay. Wuxuuna tilaabo qaadku noqonayaa sidan hoos ku xusan:

**Madaxda Sare ee Dawladda:** Go’aan qaadashada la xiriira ololeyaasha ahmiyada kowaad leh ee ay tahay in sida ugu dhaqsaha badan loo bilaabo.

**Baarlamaanka:** Hadii loo baahdo, Gollaha Shacabku, wuxuu meel marinyaa istaraatiijiyada iyo qoondada miisaaniyadeed ee loo baahan yahay.

**Wasaarada Warfaafinta:** Waxay qaabeyneysaa dhamaan ololeyaasha ay madaxda sare iclaamiyeen ayadoo ka qeyb-gelineysa wasaarada sida goonida ah ololuhu u hoostagayo.

**Wasaaradaha Heer Dowlad Goboleed:** Wasaaradaha Warfaafinta iyo kuwa adeegayada kale ee heer Maamul Goboleed, waxay si buuxda uga qeyb qaadanayaan fulinta ololeyaasha.

**Beesha Caalamka:** Dowladaha daneeya arrimaha dalkeena iyo hay’adaha samafalka, waxaa laga dalbanayaa maal-gelinta ololeyaasha wacyigelinta ee loo baahan yahay.

**Wadatashiga Taabogelinta Istaraatiijiyada:** Wasaaradda Warfaafintu, waxay xiriirineysaa shirarka guud ee wadatashiga la xiriira diyaarinta iyo taabogalinta dhamaan qorshayaasha Wacyigalinta Qaranka.

**2.0. XEERINTA ISTARAATIIJIYADDA** Ku dhowaad sodonkii sano ee ugu dambeeyay, waxaa ummadda Soomaaliyeed soo maray isbedello dhinacyada siyaasadda, amniga, dhaqaalaha iyo bulshada ah.
Waxaa isbadaladan ay ka dhasheen kadib burburkii dowladii dhexe ee dalka ka talineysay muddo dhowr iyo labaatan sano ah,kuwaas oo ay kamid yihiin:

a. In ay dadweynaha ka guurto ahmiyadda ay leedahay wadaniyadda

b. In ku dhaqanka qabyaaladda xoogeysto.

c. In dagaalo sokeeye ay dalka ka dhacaan.

d. In dhalinyaradu weyso cid ku hagta waddada qarannimo, qaarkoodna ku qaangaareen iyadoo tobanaan sano aysan dalka ka jirin dowladnimo.

e. In dhallinyaradu waayaan manhaj mideysan oo dhallinta dalka ku hanuuniya Qarannimo, Soomaalinimo iyo Wadaninimo.

f. In si khaldan u adeegsiga diinta uu badato

g. In kooxo diimeed oo xagjir ah ay soo baxaan, oo dalka falal argagixiso oo arxan la'aan ah ka fuliya.

h. In ka dhiidhinta dhibaatooyinka argagixisada aysan jirin ama aad u yar tahay.

i. In shacabka Soomaaliyeed ay garan waayaan waxtarka dowladnimada.

Hadda oo dalka Soomaaliya ay ka jirto dowlad Federaal ah, waxaa lagama maarmaan ah in ay ka shaqeyso sidii loo dadweynaha Soomaaliyeed looga wacyigalin lahaa dhibaatooyinka aan kor ku soo sheegnay.

Muhiimadda wacyigalinta, waxaa tusaale nooga filan sidii dowladdii military-ga ee dalka ka talineysay 21 sano ay diiradda u saartay in warbaahintu door lama ilaawaan ah ka qaadato wacyigalinta dadweynaha, iyadoo lagu guubaabin jiray in dalkooda difaacaan, beeraha fashaan, ka qeybgalaan iskaa wax u qabso. Waxaana la adeegsan jiray farsamooyin ay ka mid yihiin xaafadaha dadka la isugu geeyo oo la baro himilooyinka kacaanka iwm, ilaa iskuulada hoose dhexe la baro heesaha kacaanka.

**3.0. SIYAASADDA ISTARAATIIJIYADDA WACYIGELINTA QARANKA**
Wacyigelinta & Hanuuninta Dadweynaha, waa qorshayayaasha ugu muhiimsan ee dowladda.

a. Diyaarinta Istiraatiijiyadda iyo Qorshe-Howleedka Wacyigelinta, waxaa hogaankeeda iska leh Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta, Dhaqanka & Dalxiiska, oo matalaysa dowladda Federaalka.

b. Dowlad Goboleedyada door muuqda, ayay ku leeyihiin Qorshaha Wacyigelinta Qaranka. Qorshaha Qaran, wuxuu ku wajahan yahay dhamaan guud ahaan shacabka Soomaaliyeed meel kastoo ay joogaan.

**4.0. HIMILADA** In la helo bulsho Soomaaliyeed, oo caafimaad qabta, mideysan, oo u diyaar ah la hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ah iyo dowlad diidka ku dhex baahay bulshada.

**5.0. HANNAANKA**
Si loo gaaro himilada dowladda ee ku wajahan shacabka waa in wacyigelin ballaaran loo sameeyaa bulshada Soomaaliyeed, taasoo la fal-galaysa dhinacyada amniga, sharciga, dastuurka iyo doorashooyinka, horumarka, cadaaladda, caafimaadka, waxbarashada iyo dowlad wanaagga. Waa in si fiican loo isticmaalo qeybaha kala duwan ee aaladaha warbaahinta dalka.

**6.0. UJEEDDOOYINKA** Ujeeddooyinka laga leeyahay Istartaatiijiyadda Wacyigalinta, waxaa ka mid ah:

a. In laga hortaggo, oo lala dagaalamo fikirka kooxaha xagjirka ah.

b. In lagu dhiirigeliyo dhalinyarada Soomaaliyeed in ay ka qeybgalaan horumarinta dalka, isla markaana ay ka fogaadaan fikirada aan diinta Islaamka sal ku lahayn.

c. In lagu hago bulshada tubta toosan ee horumarinta dalka, wadaniyadda, is xilqaanka iyo Isqaadashada.

d. In la abuuro jawi ay bulshada iyo dowladdu ku wada fal-galaan si loo xaqiijiyo is aaminaad xoog badan.

e. In la hirgeliyo nidaamka ku dhisan daahfurnaanta iyo dowlad wanaagga.

f. In la helo ciidan Soomaaliyeed oo kasbada kalsoonida bulshada, isla markaana ku shaqeeya wadaninimo iyo u hogaansanaanta siyaasadda amni ee dowladda.

g. In la muujiyo waxqabadka dowladda ee ku aaddan daryeelka bulshada sida dib u soo celinta waxbarashada, caafimaadka iwm.

**7.0. MOWDUUCYADA AY ISTARAATIIJIYADDU FULINAYSO 7.1. KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA AH**

Fikirka Xagjirka ah ee argagixisada, wuxuu ka mid yahay aafooyinka dalkeenna ragaadiyay. Dhallinyaro badan iyo qeybo bulshada ka mid ah, oo aan laheyn aqoon diineed iyo mid maaddi ah oo ku filan, ayaa u nuglaaday marin habaabinta iyo qaadashada afkaarta xagjirnimada ee la huwiyay shaarka diineed.

In badan oo ka mid ah dadka ku sumoobay afkaarta xagjirka ah, waxaa arrintaas ku qaaday arrimo ay ka mid yihiin Aqoon la’aan, Diin jaceyl, Duruufo dhaqaale, Bulsho iyo Tabashooyin awood-sheegad ama ka qeybgalin la'aan nidaamka dowladnimo.

Sidoo kale waxaa jira dad badan, sida dhallinyarada, oo wali u nugul afkaarta xagjirka ah ee ay faafinayaan kooxaha argagixisaa ah sida Alshabaab, Alshabaab iyo Daacish.

Haddaba si loola tacaalo arrintan waxaa lagama maarmaan ah in laga hor tago faafitaanka afkaaraha xagjirka ah ee cunfiga ku dhisan iyo in lala dagaallamo afkaartan oo laga baabi’iyo dadka ay saameynta ku yeesheen.

Si haddaba loogu guuleysto labadaas howlood ee ka hortagga iyo la dagaalanka xagjirnimada, Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta, Dhaqanka & Dalxiisku, waxay dejisay qorshe wacyi gelineed oo isugu jira ka hor tagga iyo la tacaalidda xag-jirnimada sida:

a. Abaabulka Culimaa’udiinka Soomaaliyeed, Indheer garadka, Aqoon-yahanada,

b. Hoggaamiyeyaasha Dhallinyarada, haweenka iyo qeybaha kale ee ulshada,aynugaqeyb galaan la dagaalanka xag-jirnimada.

c. Diyaarinta iyo baahinta duruus diini ah, oo diiradda lagu saarayo dhex dhexaadnimada Islaamka iyo sida ay diinta Islaamku uga fog tahay xag-jirnimada.

d. Doodo dadweyne, oo dhiirri gelinaya wada noolaashaha, isu dulqaadashada iyo nabad dhisidda.

e. Farriimo warbaahineed, oo maqal iyo muuqaal ah iyo kuwo daabacan oo da’ yarta iyo qeybaha bulshada loogu sheegayo in ay ka feejignaadaan afkaaraha Khalaad ee shaarka diinta la huwiyay.

f. Barnaamijyo iyo fariimo bulshada lagu barayo sooyaalka kooxaha xag-jirka iyo dhibaatooyinkii ay muslimiinta badeen taariikhda fog iyo waqti xaadirkan.

g. Barnaamijyo tooshka ku ifinaya cawaaqib-xumida xagjirnimada (Maxay bulshada tareen xagjirku vs Maxay dhib u geysteen? Halkee noo wadaan? iwm.

## 7.2. LA DAGAALANKA QABYAALADDA

Qabyaalad, waa marka iyadoo la adeegsanayo qabiil la sameeyo eex, sadbursi xadgudub. Qabyaaladdu, waxay dhiirigelisaa kala qeybsanaanta bulshada, waxayna horseedaa burburka ummadda iyo dowladnimada.

Hadaba, waxaa lagama maarmaan in bulshada Soomaaliyeed lagu wacyigaliyo ka hortagga iyo joojinta qabyaaladda. Waxaana la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

a. In dadka la baro dhibaatada ay qabyaaladdu leedahay iyo cawaaqibka ummaddu ay ka dhaxasho.

b. In doodo furan laga sameeyo sababta ay noo qeybisay qabyaaladdu, inago dhan walba ka midaysan.

c. Isbar-bardhigga qabyaaladda iyo dowladnimada

d. Abuuridda afkaaro ka hortagaya dhaqamada adeegsiga qabiilka.

e. In laga doodo habka ugu haboon ee loo joojin karo qabyaaladda.

## 7.3. MUUJINTA WAXQABADKA DOWLADDA

Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxay si joogto ah u qabataa hawlo kala duwan, oo khuseeya dhinaycada siyaasadda, amniga, horumarka dhaqaalaha, daryeelka bulshada iyo guud ahaan taabogalinta waajibaadka qaran ee loo igmaday.
Hadaba, waxaa lagama maarmaan ah in waxqabadka dawladdu uu noqdo mid u muuqda bulshada Soomaaliyeed. Si taa loo suurtagaliyo, waxaa la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

a. In si daahfuran loo soo bandhigo waxqabadka dawladda maalin, todobaad iyo sanadkiiba mar.

b. In toddobaad walba la soo saaro barnaamijyo warbaahineed iyo wargeysyo muujinaya howlihii u qabsoomay dowladda.

c. In Warbaahinta madaxa bannaan iyo tan gaarka loo leeyahay lagu dhiirigeliyo muujinta waxqabadka dowladda.

d. Abuurista tartamo u dhexeeya howlaha dowladda si loogu tartansiiyo Isla markaana abaalmarin lagu siiyo hay'adda qabta hawlaha ugu wanaagsan saddexdii/lixdii bil ama sanadkiiba mar iwm.

e. Abuurista barnaamijyo warbaahineed oo si joogto ah bulshada ugu gudbiya waxqabadka dowladda.

f. Qabashada kulamo iyo tartamo lagu dhiirigelinayo ka warqabka dadweynaha ee waxqabadka dowladda.

g. Dhiirigelinta Ciidamada Qalabka sida iyo muujinta kaalintooda difaaca qaranka.

## 7.4. CADDAALADDA

Caddaaladda waa aas-aaska dowladnimada. Waa tiir dhexaadka iyo barta kalsoonida shacabka ka dhalato.Barnaamij wacyi gelin ah oo lagu dhiiri gelinayao doorka dadweynaha kaga aadan in la helo cadaalad dhameeystiran oo ku saleysan diinteena iyo dastuurka dalka.
Cadaaladda kama bilaabato maxakamadda ee waa silsilad ka soo bilaabata xog ururunta marka falka dhaco. Qof waliba oo muwaadin ah door ayuu ku leeyahay fulinta isku xirka iyo dhaqan gelinta cadaladda. Kalsoonida iyo wada shaqeynta waxa lagu kasban karaa in laga wacyi geliyo dadwynaha xaquuqda muwaadinka uu leyahay iyo waajibka lagu leeyahay muwaadin ahaan.

a. In la abuuro barnaamijyo nidaamyada caddaalada lagu barayo dadwaynaha.

b. In hey'adaha caddaalada ee dowlada lagu dhiiri galiyo in muwaadiniinta si eexla aan ah oo siman ugu caddaalad sameeyaa.

c. In la muujiyo dadwaynahana loo soo bandhigo guulaha dhinaca caddaalada ah ee dowlada.

## 7.5. LA DAGAALANKA MUSUQA

Musuqa marka si kooban loo qeexo waa fal dembiyeed ah ku takri fal awood ama hanti qof ama xafiis dan guud loo idmey, oo dano gaara ah lagu fuliyey.

Wacyi gelinta ku wajahan Musuqa waxaa la adeegsan karaa fariimo lagu muujinayo in musuqa caqabad ku yahay danta guud ee ummadda. Waxaa muwaadinka la dareensiin karaa in muusuq ku yahay dalka iyo danta guud.

Musuqa, ayaa la rumaysanyahay in uu yahay cudur halis ku ah Qarannimada isla markaana uu qeybta ugu wayn ku leeyahay aaminaad darrada, iyadoo qaar ka mid ah bulshadu ay ka muujiyaan Dawladnimada, wuxuu sidoo kale caawiyaa Amnidarada, Cadaalad xumada iyo kala fogaashaha Dawladda iyo Dadwaynaha, sidaas awgeed waa lagama maarmaan in bulshadu hesho Wacyigalin ku aadan Musuqa. Wacyigalinta waxaa loo qaadayaa sida soo socota:

a. In Dadwaynaha iyo Mas'uuliyiintaba la baro waxa loola jeedo Musuq iyo nuucyada uu ka koobanyahay.

b. In labaro Bulshada, Ciidamada iyo Masuuliyiintaba Ciqaabaha ka dhasha Musuqa,heer ama nuuc kasta uu yahay.

c.

d. In la barto dhibta uu Dal iyo Dadba u leeyahay Musuqa iyo natiijada xun ee laga dhaxlo aduun iyo Aakhiraba.

**7.7. BARISTA WADANIYADDA** Mid ka mid ah sababaha uu Dalku u soo kabsan la'yahay, waxaa lagu tilmaamaa in ay tahay, iyadoo aanay dad badani faham ka heysanin micnaha wadaniyadda iyo waxa ay u taagan tahay, sidaas awgeed waa lagama maarmaan in la helo Wacyigalin barta Bulshada micnaha Wadaniyadda. Si taas loo hirgaliyo waxaa la qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

a. In la qabto Doodo la isku waydiinayo waxa ay u taagan tahay Wadaniyadda.

b. In la abuuro Barnaamijyo Taxane ah, oo Cilmi ahaan ubaraya Bulshada waxa loola jeedo Wadaniyad.

c. In la soosaaro fariimo muujinaya qiimaha iyo faaiidooyinka uu muwaadinka u leeyahay Dalkiisu.

d. In la dajiyo hannaan ay Dadwaynuhu ugu tartamaan Wadinayadda, oo lagu bixiyo Abaalmarinno.

e. In aad loo muujiyo Dadka ku Calaamaysan Wadaniyadda sida naftood hurayaashii iyo kuwa la mid ka ah si ay ugu daysadaan Bulshada hadda nool.

**7.7. DHIIRIGELINTA IS-XILQAAN-KA**

Is-xilqaadnimadu, waa tallaabo muujinaysa in bulshadu si iskood ah ay uga qeybqaataan horumarinta bulshada dhinacyada ka qeybgalka suggidda amniga, kobcinta dhaqaalaha, xoojinta kaabayaasha dhaqaalaha, kobcinta aqoonta dadweynaha.

Is-xilqaanku, wuxuu astaan u yahay wadaninimo iyo dal jeceyl. In la dhiirigeliyo in bulshadu dalkooda u dhistaan si iskaa wax u qabso ah, waxay keenaysaa in bulshadu ku kalsoonaato dawladooda, kana qeybgalaan dadaalada dowladda. Si loo dhiirigeliyo ka qeybgalka dadweynaha ee horumarinta dalka, waxaa la qaadayaa talaabooyinka soo socda:

a. **Abuurista Hal ku dhegyo dhiirigelinaya Is xilqaanka**:

- Dhiso Dalkaaga.
- Isku tashi.
- Dan Wadaag.
- Ka qeybgal sugidda amnigaaga.
- Ka qeybgal horumarka dalkaaga. Iwm.

b. **Qabashada Kulamo dadweyne:**

- Ka qeybgalinta bulshada soo bandhigga waxqabadka dowladda.
- Dhageysiga tallooyinka qeybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed.
- Shirar heer Laan, Xaafad, Degmo oo bulshada lagu xusuusinayo ka qeybgalka barnaamijyada Iskaa-Wax-U-Qabso ee dowladda.
- Xusuusinta bulshada taariikhda Iskaa Wax u Qabso ee qeybo badan oo dalka ah lagu dhisay.

**c. Dhiiri-gelinta ka faa'iideysiga awoodda muwaadinka:** Waxaa muhiim ah in muwaadiniinta lagu dhiirigeliyo qaadidda tallaabooyin iskaa wax u qabso ah, kana qeybgalo kuwa kale ee ka socda laantiisa, xaafadiisa,degmadiisa iyo dalkiisa. Waxaa tallaabooyinkan laga bilaabi karaa in lagu dhiirigeliyo muwaadinka in uu:

- Ka qeybqaadashada sugidda amniga gurigiisa, deriskiisa iyo degmadiisa.
- Xaqiijinta fayo-dhowrka goobta uu degan yahay iyo guud ahaan deegaankiisa.
- Ka qeybqaato isku soo dhoweynta, wadajirka iyo isqaadashada bulshada.

## 7.8 FAHAMSIINTA DADKA EE DOWLADNIMADA

In ka badan 75% dadweynaha Soomaaliyeed, ayaa lagu qiyaasay in ay yihiin dhalinyaro, taasoo macnaheedu yahay in 75% dadweynaha Soomaaliyeed aysan garaneynin dowladnimo waxa ay tahay, faa'iidooyinkeeda iyo sida shaqsiga, qoysaska iyo dadweynahaba ay dowladnimadu muhiimka ugu tahay iyo sida ay u adag tahay in dowlad la'aan la noolaado. Taas, waxaa sabab u ah in dalka Soomaaliya muddo ku dhow soddon sano ka hor ay ka burburtay dowladii dhexe.

Haddaba, waxaa lagama maarmaan ah in dadweynaha la baro dawladnimada, iyadoo la qaadayo talaabooyinka soo socda:

**a. Barista dadka Dowladnimada:**

- Macnaha dowladnimada,
- Sida ay u shaqeyso dowlad,
- Noocyada dowladnimada,
- Mas'uuliyadaha hey'adaha dowladda,
- Qaab-Dhismeedka dowladnimada,
- Faa'iidoonyinka dowladnimada,
- Xuquuda muwaadinka ku leeyahay dowladda,
- Waajibaadka muwaadinka ka saaran dowladnimada.

## 7.9. XOOJINTA MIDNIMADA

Bulshada Soomaaliyeed, waa bulsho isku diin, af, dhaqan, isir, midab, taariikh iyo masiir ah, balse muddooyinka dambe waxaa soo ifbaxay arrimo khatar ku ah midnimada ummadda Soomaaliyeed. Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in laga shaqeeyo sidii loo xoojin lahaa, oo dhidibada loogu aasi lahaa. Tallaaboyinka soo socda ayaa la qaadi karaa:

a. Qeexista macnaha iyo faa'iidooyina ay leedahay midnimada.

b. Muujinta, ilaalinta iyo adkeynta astaamaha midnimada qaran.

c. Muujinta halisaha ku xeeran midnimada iyo ka hortagga halisahaas.

d. Xoojinta dhaqanka soo jireenka ah ee ummadda Soomaaliyeed.

## 7.10. LA DAGAALANKA DANEYSIGA GAARKA AH

Danaysiga iyo waliba danta gaarka ah oo laga hormariyo midda guud waxay keentaa burbur qaran, kala qaybsanaan saamayn ku yeelata nolasha Bulshada oo dhan, sidoo kale waxay dhaawacdaa karaamadda iyo sumcadda shacabka Soomaaliyeed.

Dib u yagleelidda hay'adaha dowladda Soomaaliyeed waxaa suura galin kara in mudnaan koobaad lasiiyo fulinta danta guud ee kawada dhaxaysa Ummada Soomaaliyeed ee u ooman Dawlad hanaqaada.

a. Sameynta barnaamijyo dadka looga digayo danaysiga gaarka ah.

b. Heeso guugaabo ah iyo ruwaayado lagu muujiyo xumaanta daneysiga gaarka ah.

c. Baridda bulshada danta guud waxa ay tahay, iyo qiimaha ay leedahay mudnaata koowaad in la siiyo taaba-galinta danta guud.

d. Bulshada in laga wacyi galiyo khatarta ay leedahay danaysiga gaar ka ah iyo dibu dhaca uu u keenahayo Dawladnimada.

e. Baahinta Baraamijyo diiradda lagu saarahayo in wadaniyadu tahay dhawrista danta guud ee Qaranka.

f. Baaritaan lagu sameeyo sababaha keenaya daneysiga in ay dhaqan u noqota dadka qaarkood.

g. Dhiiri galinta dadka mudnaanta koowaad siiya danta guud iyo waliba abaalamrintooda.

h. Baahinta siyaasadaha guud ee Dawladda ee laxiriira ilaalinta danaha guud iyo hantida Qaran-ka.

## 7.11. DHIIRIGELINTA WAX SOO SAARKA DALKA

Soomaaliya, waxay lahayd wax soo saar ay u dhoofiso dibedda dalka iyo mid loo isticmaalo gudaha. Dowladdii dhexe, ayaa dadaal weyn u gashay sidii bulshada ay dalkeeda wax uga soo saaran lahayd. Soomaaliya, waxay soo saari jirtay si loo dhoofiyo, waxaana ka mid ahaa: Dalaga Beeraha sida: Mooska, Xoolaha Nool iyo Hargaha iwm.

Hadaba, waxaa haboon in la abuuro dadaalo lagu dhiirigelinayo in bulshada ay la yimaadaan wax soo saar cusub, lana helo suuq ay beeraleyda, xoolaleyda iyo guud ahaan ganacsatada wax soo saarta u iibgeeyaan suuqyo dibedda ah.

a. In la bilaabo wacyigelin ku aadan qiimaha wax soo saarku u leeyahay dhaqaalaha dalka.

b. In xukuumadda dadaal u gasho helitaanka suuqyada loo dhoofinayo wax soo saarka bulshada Soomaaliyeed.

c. In horumar laga sameeyo nidaamka wax beeridda iyo xoolo dhaqashada si waafaqsan nidaamyada caalamiga ah ee dhoofka.

## 7.12. CAAFIMAADKA

Caafimaadku waa mid ka mid ah meelaha ay u baahan tahay bulshada Soomaaliyeed in ay ka hesho wacyigalin ballaaran. Hadaba, iyadoo laga duulayo siyaasadda dowladda ee gaarsiinta bulshada adeegyo caafimaad, waxaan halkan ku soo gudbineyna qaabka wacyigalinta:

a. In bulshada la baro siyaasadaha caafimaad ee dawlada, iyadoo lala tashanayo wasaaradda caafimaadka.

b. In bulshada lagu wacyi galiyo dhibaatada ka dhalan karta caafimaad darrada

c. In bulshada loo sameeyo kulamo lagu barayo baahiyaha degdega ah ee looga hortagayo caafimaad darada.

## 7.13. WAXBARASHADA

Aqoontu waa sirta ka danbaysa horumarka ay gaarto Ummad, markasta oo Bulshadu qiimo gaar ah siiso waxbarashada, waxaa kobca garaadkooda, dhaqaalahooda, nabadda iyo is dhaxgalka,wada noolaashaha, iyo daris wanaagga.

Waxaa jira xiriir ka dhaxeeya aqoonta, dhaqanka iyo maanka bulshada, markasta oo ay aqoontu sare u kacdo waxaa kobcaya wacyiga siyaasadda, dhaqanka, fikirka iyo wadaniyadda bulshada, sababtuna waxay tahay Aqoontu waa iftiin aan damaynin, laguna dhiso dadka iyo dalka. Hadaba si aan u helno dhalinyaro aqoon iyo tayo waxbarashaba leh. waxaan u baahannahay inaan qaadno talaabooyinka soo socda:

a. Diiradda in lasaaro ahmiyadda ay leedahay midaynta manaahita waxbarasho ee dalka ka jira.

b. Kor u qaadista tayada waxbarashada dalka

c. Faaf reebitaadda waxbarashada dalka

d. Wadaniyadda iyo taariikhda dalka in laga sameeyo Baraamijyo

e. Wacyi galinta qoyska soomaaliyeed in ay caruurtooda u diraan iskuulada

f. Bixin waxbarasho lacag laa,aan ah, gaar ahaan carauurta saboolka ah

g. Dibu eegista aqoonta laga qaato Masaajidda, lagana sameeyo baraamijyo ifinahaya sooyaalkeeda.

h. Dhiiri galinta furitaanka xanaanooyinka Caruurta, iyo waliba qiimaha ay u leedahay kobcinta garaadka u badadka.

i. Dhiiri galin furidda xarumo aqooneed oo bulshada lagu wacyi galiyo, lagana sii daayo warbaahinta.

j. Dhisidda idaacado waxbarashada dhiiri galiya ( iskuulada, Jaamacadaha)

k. Qabasho tartan aqooneed, lagu bixinayo abaal marinno.

l. Inkastoo burburkii dhacay sagaashameeyadii uu baabi'iyay nidaamkii waxbarasho ee dalka, waxaa muuqata hadda in ay jirto soo kabasho mudan in la dardargaliyo.

## 7.14. DHIIRIGELINTA DIB U HESHIISIINTA IYO IS QAADASHADA

Dadka Soomaaliyeed, waxaa dhexmartay colaad wajiyo badan lahayd: Qabiil, Siyaasad, Deegaan, Dhul iyo Daaqsi. Boogihii ay colaadahaas reebeen waxay u baahan yihiin in si rasmi ah loo dhayo.

Isla Xaaladaahaas Colaadeed, waxay abuureen kala shaki iyo isdiidmo Dadka Soomaaliyeed dhexmartay taas oo keentay in Bulshadeenu ay noqoto mid kala taagan, oo meelo badan aan is ogolayn.

Haddaba, mid ka mid ah tiirarka xalka waara looga gaari karo caqabadahaan ahna tan ugu muhiimsan, waa in laga wacyigaliyo Dadwaynaha Dhaqamada Gurracan ee ay reebeen Colaadaha iyo kala qeybsanaanta, waxaana soo jeedinaynaa Qodobadaan.

a. In la hirgaliyo Barnaamijyo isugu jira Doodo, Fariimo, Riwaayado, Wacdi Diini ah iwm. Kuwaas, oo dhamaantood ku dhiirigaliya Bulshada in ay dhayaan Nabarrada dhexdooda ah.

b. In la abuuro isla nuucyo wacyigalin, oo la mid ah kuwa kor ku xusan, oo ku tartarsiiya Bulshada in ay lama huraan tahay in aan is aqbalno, isna qaadano innagoo isu dulqaadanayna si aan uga baxno isdiidista muddada soo jirtay.

c. In la baro Bulshada sida Dunidu uga gudubtay Colaadihii soo dhexmaray, una midoobeen taas oo ah habka kaliya ee lagu gaari karo barwaaqo.

d. In la abuuro Barnaamijyo ku dhiirigalinaya Bulshada in aan isa saamaxno, isla markaana la isku garaabo, iyadoo loo sharaxayo faaiidooyinka Aduun iyo kuwa Aakhiro ee ka dhasha tanaasulka wanaagsan.

e. Ugu danbayn in Bulshada loo iftiimiyo Khataraha ka dhalan kara kala qaybsanaanta iyo isqaadasho la’aanta iyo sida ay halis ugu yihiin Qarannimada.

## 7.15. CANSHUURAHA

Canshuuruhu waa qaaraan ay dadweynuhu uga qeyb qaataan dhismaha iyo jiritaanka dowladdooda, waana mid waajib ku ah muwaadin kasta ee canshuurtu ku waajibto. Canshuurtu waxay ku soo noqotaa bulshada oo loogu fidiyo adeegyada ay u baahan yihiin sida Jidadka, Iskuullada, Caafimaadka, Waxbarashada iyo kaabeyaasha kale ee muhiimka u ah horumarka dowladnimada.

Sanado badan, oo aan canshuuro la qaadin darteed, waxaa muuqata in bulshadeennu illaaween bixinta canshuuraha iyo micnaha ay ku fadhiso intaba. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay arrimaha soo socda:

a. In la qaado ololeyaal bulshada loogu sheegayo in ay bulshada bixiyaan.

b. In bulshada la baro macnaha iyo faa’iidooyinka canshuurta.

c. Diyaarinta doodo iyo barnaamijyo ku saabsan sida ay waajib u tahay bixinta canshuurta ayna ceeb u tahay canshuur la baxsadka.

d. Soo bandhigista dhibaatada ay na dhaxalsiisay canshuur bixin la’aantu.

e. Muujinta in canshuurtu saldhig u tahay horumarka ay dalalka nala midka ahi gaareen markii ay canshuurta bixiyeen.

f. Muujinta in aynaan qaran ku sii ahaan karin canshuuro ay bixiyeen dadyow nala mid ah oo dalal kale na siiyaan.

g. In canshuurtu tahay habka kaliya ee aan ku gaari karno isku filnaasho dhaqaale.

h. In bulshada la galiyo kalsooni ah in canshuurihii ay bixiyeen loo maamulayo si daah furnaan iyo ammaano ku jirto.

i. Gudbinta wacyi gelintan canshuuraha waxaa loo adeegsanayaa dhammaan hababka war is gaarsiineed ee jira.

## 7.16. BARISTA BULSHADA DASTUURKA IYO XEERARKA KALE EE DALKA

Dastuurku KMG ahi waa xeerka ugu sarreeya ee uu dalku leeyahay, waxaana muhiim ah bulshada Soomaaliyeed si buuxda uga war hayaan waxa ku qoran dustuurka lagu dhaqayo. Wuxuu kaluu dalku leeyahay xeerar kale oo ay lagama maarmaantahay in bulshada labaro. Sidaas darteed Wasaaradda Warfaafintu iyadoo kaashaneysa wasaaradaha iyo hay'adaha dowliga ah ee ku shaqada leh waxa ay diyaarisay barnaamijyo dadka lagu barayo Dastuurka KMG ah ee jamhuuriyadda Federaalka, kuwaas oo si toos ah uga baxa Qeybaha kala duwan ee Warbaahinta Qaranku ay ka kooban tahay.

Dhinaca kale ku dhaqanka sharciga, waxaa sal u ah in muwaadiniintu u siman yihiin, oo sharcigu qabanayo cid kasta. Sharciga oo loo hoggaansamaa waa ilbaxnimo horseedda horumarka aadanuhu hiigsanayo.

Haddaba, iyadoo laga duulaayo baahida loo qabo in dalku uu nabad iyo horumar gaaro, ayaa waxaa lagama maar maan ah in qof kasta oo muwaadin ah la baro sharciga iyo siyaasadda dalku ku dhisan yahay.

a. Si loo dhiirigeliyo u hogaansanaanta sharciga iyo xeerarka dalka u degsan, waxaa loo baahan yahay in la sameeyo talaabooyinkan hoos ku xusan.

b. Sameynta wacyigalin ballaaran, oo ku wajahan muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyadoo la adeegsanayo aaladaha warbaahinta qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

c. Sameynta dood cilmiyeedyo ku saabsan barashada sharciga iyo xeerarka dalka

d. In Manhajka Dalka lagu daro barashadda Shuruucda dalka.

Sidoo kale waxaa la diyaariyay barnaamijka Xeerarka Dalka, oo dadka lagu barayo cutubyada iyo qodobbada uu ka kooban yahay dustuurku, iyadoo la adeegsanayo khubaro ku xeel dheer dhinaca dastuurka. Waxaa kaloo barnaamijku dadka barayaa xeerarka kale ee dalku leeyahay.

## 7.17. BARISTA BULSHADA FEDERAALEYNTA

Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa fikir khaldan ka haysta nidaamka Federaalka oo ay u arkaan mid dadka kala qeybinaya, waxaana lagama maarnaan ah in bulshadu helaan macluumaad dheeri ah oo la xiriira Federalism-ka, Noocyadiisa iyo Faa'iidooyinkiisa.

Marka ay bulshadu hesho faham dhameystiran oo la xiriira federalism-ka ayay gaari karaan go'aan sax ah oo aan laab la kac ahayn, marka la gaaro cod bixin dadweyne oo lagu oggoaanayo ama lagu diidayo qaadashada nidaamka federaalka. Sidaas darteed ayay Wasaaradda Warfaafintu qaadaneysaa door wacyi galineed oo la xiriira arrintanta fahamsiinta bulshada ee federaalka, taas oo loo marayo.

a. Barnaamijyo Warbaahineed, oo lagu casuumayo dad khibrad u leh arimaha la xiriira nidaamka Federaalka

b. Farriimo kookooban (PSA)

c. Doodo dadweyne

## 7.18. DOORASHOOYINKA

Tan iyo 1967-kii dalkeenna kama dhicin doorasho dadweyne oo ay dadku soo doorteen wakiiladii matali lahaa. Hadda oo la qorsheynayo in dalka laga hir geliyo doorasho qof iyo cod ah 2020, waxaa muhiim ah in bulshadu helaan wacyi gelin aad u weyn oo la xiriirta doorashada, xeerarkeeda iyo hababka loo marayo.

a. Wasaaraddu iyadoo kaashaneysa hay'daha ku shaqada leh, ayay qaadaneysaa doorkeeda wacyi gelineed ee la xiriira doorashada.

b. Waxaa bulshada Soomaaliyeed la barayaa macnaha doorasho iyo muhimmadda ay leedahay.

c. Diyaarinta barnaamij u gaar ah arimaha doorashooyinka, kaas oo xubnihiisa inta badan lagu falaqeyn doono wax kasta oo ku saabsan doorashooyinka.

## 7.19. DHIIRIGELINTA AFKA, FANKA IYO DHAQANKA

Afkeenna hooyo waa astaan midnimo iyo summad aan uga duwan nahay ummadaha kale. Waa Af hodan ah oo looga hadlo 4 dal oo gobolka ku yaal. Dhowrista iyo horumarinta Afku waa howl looga fadhiyo dowladda Soomaaliyeed,waxaana arrintaas ugu xil saaran wasaarado iyo hay'ado ay ka mid tahay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska waxa ay hadaba wasaaradu qorsheysay fulinta olole lagu xoojinayo Afka hooyo waxa ayna fulineysaa arrimaha soo socda:

a. **Barnaamijka Afka Hooyo,** Iyadoo laga duulayo lagama maarmaannimada in bulshadu ku dhaataan aadna u bartaan afkooda hooyo, gaar ahaan da' yarta iyo qurbe joogta,ayay wasaaradda iyo Akaademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaantu iska kaashanayaan barnaamij ka baxaya Telefishanka iyo Raadiyaha, laguna faafinayo Online-ka, kaas oo bulshada gaar ahaan dhallinyarada lagu barayo Afkooda hooyo iyo xeerarkiisa qoraal iyo akhrisba. Barnaamijkan oo socon doona muddo 2 sano ah waxaa iska kaashanaya Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska iyo Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta.

b. **Xoojinta Fanka** Soomaalidu waxa ay leedahay fan iyo suugaan fac weyn oo ka mid ah hababka ugu sahlan uguna saameynta badan ee bulshada wax lagu gaarsiiyo. Wasaaraddu waxa ay ku howlan tahay in la xoojiyo fanka, si taas loo helana waxaa wasaaraddu ku howlan tahay abuurista jawi suurto galinaya in si xowli ah looga faa'iideysto qeybaha kala ee fanka. Waxyaabaha udub dhexaadka u ah howshaasna waxaa ka mid ah.

c. **Golaha murtida iyo Maddadaaladu** waxa uu ahaa barta ay ku kulmaan hal abuurrada Somaaliyeed iyo kooxaha fanku, si ay ugu soo bandhigaan farriimaha lagu baddelayo wacyiga bulshada Soomaaliyeed. Sidaas darteed ayay Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska mudnaan gaar ah u leedahay dib u howl gelinta Tiyaatarka Qaranka, si uu u qaato doorkii uu lahaa.

**d. Isku dubbaridka Kooxaha Fanka** Dalku waxa uu leeyahay kooxo kala duwan oo faneed, kuwaas oo u baahan in la isu duwo, lana mideeyo dadaalladooda iyo farriimaha ay bulshada u gudbinayaan, taas oo haddi

lagu guuleysto keeni karta in ololeyaasha wacyi gelineed ee qorsheysani xilli kooban ku miro dhalaan.

**e. Qabashada Bandhig Faneedyo** Wasaaraddu ay fulineysaa bandhigyo iyo barnaamijyo lagu horumarinayo Fanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed, taas oo qeyb weyn ka qaadaneysa horumarinta Afka hooyo, fursadna u siineysa suugaanleydu in ay bulshada ku xirmaan ayna hab faneed ku gaarsiiyaan farriimaha wacyi gelineed ee la xiriira dhaqanka, fanka iyo suugaanta.

**f. Hibada iyo Hal Abuurka** waxa ay hormuud ka noqoneysaa qabashada tartammo lagu soo saarayo hibooyinka iyo hal abuurnimada faneed ee ku duugan da’ yarta Soomaaliyeed, kuwaas oo ku tartamaya qeybaha kala duwan ee fanka, sida gabayada, Heesaha, masraxiyadda, mu’allifnimada, Laxammada, Qoraalka iwm. Tani waxa ay suurto gelineysaa in ay soo baxaan dad badan oo wax ku soo kordhiya fanka iyo dhaqanka dalkeennu leeyahay.

## 7.20. DHIIRIGELINTA CIIDAMADA IYO MUUJINTA DOORKOODA

Dalkasta waxa uu ku tiirsanyahay Awoodda Ciidan ee uu leeyahay iyo sida Bulshadiisu kalsooni ugu qabto Ciidamadiisa isla markaan Ciidamadu ay ugu kalsoon yihiin Shacabkooda, hadaba Dalkeenna oo burburkii dheeraa uu saamayn xun ku reebay sumcaddii Ciidamada Qaranka iyo Sida ay bulshadu u aragto ciidanka iyo kaalintiisa.

Waa muhiim in dib looga fikiro sidii Ciidamada loogu soo celin lahaa Doorkii ay ku lahaayeen quluubta Shababka si taas la mid ahna waa in Askariga laga dhigaa mid qalbigiisu uu la jiro Muwaadinka uu u adeegayo.

Hadaba Ciidamada Qaranka ee xilligaan jira waa kuwo haya howl aad u culus oo Maalin kasta ay kala kulmaan, Dhimasho, Dhaawac iyo aflagaado, una dheertahay in ay qabaan baahiyo dhinacyo badan.

Dhinaca kalana Shacabka oo ah kan loo adeegayo qaybo badan oo ka mid ahi uma hayaan garawshiyaha ay mudan yihiin Ciidamadu, umana arkaan in ay yihiin badbaadiyahooda, si taas la mid ahna qaybo badan, oo ka mid ah Ciidamadu ma dareensana Masuuliyadda ka saran Muwadinka taas oo keenta tacadiyo aan loo baahnayn in ay ugaystaan Bulshadii ay u

adeegayeen. Si loo abuuro isu soo dhawaasho Ciidamada iyo Bulshada isla markaana loo muujiyo kaalinta Ciidamada Naftood hurayaasha ahi leeyihiin waxaa loo baahan yahay in lahelo Wacyigalin labo dhinacle ah, oo Ciidamada iyo Bulshadaba ku hagta Dariiqa toosan.

a. Waxaa la abuurayaa Barnaamijyo ka faalooda micnaha Askariga Maanta iyo sida uu naftiisa ugu hurayo Shacabkiisa, oo uu uga hor taagan yahay khataraha.

b. Waxaa la muujinayaa noocyada halista uu askarigu uga hor gudban yahay muwaadinka Soomaaliyeed.

c. Waxaa la qeexayaa waxa uu mudan yahay Askarigaas, iyadoo laga eegayo Diinta iyo Damiirka labadaba.

d. Askariga, waxaa la barayaa in uu yahay u adeegaha muwaadinka.

e. Askariga waxaa la xusuusinayaa si joogta ah in uu kala garto cadawga iyo Saaxiibka, oo uusan isla si ula dhaqmin.

f. Muwaadinka, waxaa la barayaa in haddii aanu jirin Askari uuna jiri karin Qaran, Amni, Nolol iyo waxkasta oo kale.

g. Muwaadinka waxaa la xusuusinayaa u hogaansamidda iyo Xushmadda Askariga, halka Askarigana loo sheegayo ladhaqanka wacan ee Bulshada.

h. Waxaa la abuurayaa hanaan Taariikheed oo looga faalooda Geesiga ushahiida Qarannimada

## 8.0. FARIIMAHA MUHIIMKA AH

Istaraatiijiyadani waxay wajahaysaa labo shacab oo kala duwan, waxayna xambaarsan tahay fariimo kala duwan oo is garab socda. Qeybta hore ee Wacyigelintu waxay ku wajahan tahay madaxda, masuuliyiinta iyo

dhamaan hawl-wadeenada dowladda. Waxayna si midaysan uga duulaysaa sidii dowlad wanaaga looga dhabayn lahaa, looguna qancin lahaa loona aaminsiin lahaa ummada Soomaaliyeed nidaamka dawliga. Dhanka kale wacyigelintu waxay xoogga saareysaa qaabkii shacbi-weynaha loogu abuuri lahaa wadaniyad buuxda, isla markaana loogu jaheyn lahaa hiigsiga qaran ee saldhigiisu yahay horumar iyo barwaaqo.

## 8.1.FARIIMAHA KU WAJAHAN DOWLADDA

a. **Hiigsiga Qaran:** Muxuu yahay itijaaha siyaasiga ee dalku? Waxaa laga maarmaan ah in la qeexo masiirka siyaasiga ee dalka ayna ku baraarugsan yihiin dhamaan xubnaha dowladdu si ay u gutaan masuuliyada ka saaran ka dhabeynta hadafka siyaasiga ee qaran. Xagee joognaa maanta halkeese hiigsanaynaa inaan gaarno weeye arrinta ugu muhiimsan wacyiga qaran ee loo baahan yahay maanta

b. **Hufnaanta Shaqada:** Shaqada iyo Hawsha uu masuul kasta u hayo qaranka waa inay ka muuqato hufnaan iyo daacadnimo adeeg. Si taasi u hirgasho waa in madaxda iyo masuuliyiinta dawlada lagu wacyigeliyo shaqo hufan oo aan eex iyo musuq lahayn inay xafiisyada dawladda ka muuqato in adeeg ahaan loo siman yahay.

c. **Xaq-dhowrka Shacbiga:** waa in shacbigu dareemaan in la xaqdhawro xogta, macluumaadka iyo tilmaanta ay u baahan yihiina ka helaan masuuliyiinta iyo hawlwadeenada dawladda. Waana in arrintaan lagala hadlo masuuliyiinta iyo hawlwadeenada dawladda gaar ahaan ciidamada amniga

d. **Cadaalad iyo Garsoor Hufan:** Cadaaladu waa xubinta Ugu muhiimsan suurto galinta dawladnimada waana arrin aad ugu weyn shacbiga, wali maahan sidii la rabay. Sidaas daraadeed waa in garsoorayaasha iyo hawlwadeenada cadaalada lagala hadlo ahmiyada ay leedahay xiligaan inay cadaalad falaan si kalsoonida shacbiga loo kasbado. Waana in la hubiyo madaxbanaanida cadaaladda oo farogelin laga ilaaliyo. Hadafkuna waa in sharcigu sidii loo dajiyay u shaqeeyo, sharciguna shaqadiisa qabsado.

e. **U hogaansan Sharciga:** Dartuurka iyo sharciga dalka in loo hogaansamo waxay ka bilaabataa dawladda sidaas buu shacbiga ugu gudbi karaa ama ay ugu hogaansami karaan. Dastuurka iyo shuruucda dalka u yaal waa inay madaxda iyo hawlwadeenada dawladdu yaqaanaan una hogaansamaan.

f. **Tilmaanta Qorshaha Horumarinta Dalka:** Masuulkasta iyo hawlwadeen kasta oo dawladdu waa inuu ku baraarugsan yahay doorka uu ku leeyahay hirgelinta qorshaha horumarinta dalka.

g. **Ka Waantow Musuqmaasuq iyo Eex:** Musuqmaasuqa iyo eexdu waxay sumcadda xafiiska, dawladda iyo hogaanka siyaasiga. Waxayna caqabad rasmi ah ku yihiin hiigriga horumar iyo qaranimada Soomaaliya. Shaqada dawladdu maahan mid tabac iyo taajirnimo lagu gaaro ee waa mansab adeege bulsho. Sidaas daraadeed waa in aragtidaas caamka noqotay ee khaldan wax laga badalo wacyi ahaan. Dhanka kale eexdu waa inay noqoto wax laysku ceebiyo si ay u dhacdo sinaan fursad shaqo dowladeed.

h. **Abuuridda Fursado Shaqo iyo Koboc Dhaqaale:** Masuuliyiinta dawladdu waa inay ku baraarugsan yihiin in looga fadhiyo ama had iyo jeer laga sugayo inay ummada gaar ahaan aqoonta iyo xooga dhalinyarada u abuuraan furshad nololeed oo ay ku hiran karaan. Qodobkani waa arrinta ugu weyn ee guusha iyo guul darada dawladda lagu qiimaynayo.

i. **Ka Dhabee Balan-qaadka:** Ummada kuma filna rajo abuurid oo kaliya waxay u baahan yihiin inay arkaan balan-qaad fula iyo natiijo wax-qabad oo dhab ah.

j. **Wada-shaqeyn Buuxda:** Hawsha iyo adeega dawladdu maahan tartan ee waa mid ku salaysan wada-shaqenta qeybaha kala duwan ee dawladda. Taasna waa in lagu wacyigeliyo dhamaan masuuliyiinta iyo hawlwadeenada dawladda.

k. **Fariin Midaysan:** Mideynta fariinta dawladda ee midaysani waxay bixinaysaa sawir fiican waxayna xoojinaysaa kalsoonida shacbigu ku qabaan dawladda. Sidaas daraadeed waa in la mideeyo friimaha ka baxaya xafiisyada dawladda. Waana in laga dheeraado in

xubnaha dawladdu warbaahinta iyo baraha bulshada isku buriyaan ama isku khilaafaan oo isku mucaaradaan. Wixii khilaaf ah ee jira waa in qaab hoose loo xaliyo inta aanu warbahinta galin.

l. **Hagaaji Xiriirka Bulshada:** Dhamaan xafiisyada dawladdu waxaa masuuli6ad ka saaran tahay inay hagaajiyaan xiriirka rasmiga ee ay la leeyihiin bulshada. Dhamaan mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeenada dawladdu waa inay ku baraarugsan yihiin baahida loo qabo xiriir wanaaga bulshada ee aas-aasiga u ah dawladnimada.

m. **Safarada Shaqo ee Xubnaha Dawladda:** Maadaama ay dhaliilo badan ka yimaadaan safarada shaqada ee dowladda sidee loo wajahayaa ka fal-celinta dhaliilahaas? Waa in dowladu muujiso tanaasul ku wajahan safarada aan mudnaanta lahayn ee waqtiga iyo dhaqaalaha aadka loogu baahan yahay qaadanaya. Waana in lays waydiiyo wax ka soo baxaya safar kasta oo masuul dalka dibadiisa ugu baxayo. Waana in la shaaciyaa wixii ka soo baxay safarada laga maarmi waayo ee ahmiyada leh.

## 8.2. FARIIMAHA KU WAJAHAN SHACABKA

a. **Hal Dal, Hal Calan iyo Ummad Midaysan:** Muujinta iyo xoojinta midnimada Soomaaliyeed waxay ku xiran tahay hadba inta shacabkeedu ku qancaan qiimaha midnimadu u leedahay. Dawladdu waxay qaadaysaa olole ku wajahan xoojinta iyo xaqiijinta midnimada iyo wada jirka ummada iyo dalka Soomaaliyeed. Waana in la abuuro wacyi keeni kara in qofkasta oo Soomaali ah ku qanco kuna shaqeeyo doorka muhiimka ah ee midnimadu leedahay.

b. **Qaranimo iyo Dawladnimaa na Deeqa:** Waxaa shacbiga lagu baraarujinayaa manfaca iyo qiimaha weyn ee dawladnimada u wada leedahay. Waxaana lagu dhiirigelinayaa inay garab istaagaan qaranimada iyo madaxbanaanida ummadeed ee Soomaaliya.

c. **Walaalnimadu waa u Door Guul:** Hadafka ololahani waa in ummada la walaaleeyo, laysna jeclaysiiyo isla markaana laga dhex abuuro kalsooni dhab ah.

d. **Dantaadu Waxay ku Jirtaa Mida Guud:** Ololahani wuxuu abuurayaa in wacyiga qof kasta oo Soomaali ah la gaarsiiyo inuu had iyo jeer danta guud ka hormariyo tiisa goonida. Waxaa xooga la saarayaa qaabkii looga gudbi lahaa wacyi shaqsiyada ama anaaniyada iyo hanti-goosiga liita ku salaysan ee mudadadii dawlad la'aanta laga dhaqan yeeshay.

e. **Nabad iyo Nolol:** Ololahan wuxuu xooga saarayaa muujinta guulaha dhinaca amniga ee dawlada federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah ay ku talaabsadaan si bulshadu ugu war hayso dadaalka lagu xaqiijinayo in nabad buuxda la helo.**nabad la helaa nolol la hel**. nolosha waxa tiir u ah nabada. waxay umadu ka fikiri kartaa horumar iyo waxqabsi marka ay hesho nabad buuxda

f. **Siyaasad Horu socodka:** Waa in la muujiyo horumar siyaasadeed oo rajo iyo hami galiya ummada. Taasina waxay ku suuroobaysaa in madaxda dalku ay aragti dheer iyo daacadnimo ku hagaan siyaasada dalka, loona turjumo sida ugu qurxoon oo dadku u fahmi karaan. Waxaa kaloo muhiim in la suurto galiyo in sidii shacbiku door ku haboon uga qaadan lahaayeen katalo bixinta siyaasada dalka, iyadoo fursado la siinayo,guud ahaan shacabka gaar ahaana, dhalinyarada, dumarka iyo dadka la hayb sooco.

g. **Meeqaamkeena Caalamka:** Soomaaliya waxay caalamka ka joogtay meeqaam sare intii ay jirtay dowladii dhexe ee milatariga iyo dawladihii rayidka ee ka horeeyey.hasayeeshee wixii ka danbeeyey burburkii dowladnimo waxa aad hoos ugu dhacay meeqaamkii Soomaaliya ee ay caalamka ku lahayd sababa la xiriira dowlad la'aantii, dagaaladii sokeeye, budhcaddeedii qeybo kamid ah dalka ka dilaacday iyo falalka argagixiso ee kooxaha xagjirku ay ka geysteen gudaha dalka iyo dibadiisaba. hadaba waxa lagama maarmaan ah si loosooceliyo meeqaamkii Soomaaliya ee caalamka waxa haboon in xooga lasaaro muujinta waxqabadka dowlada, horumarka dhinacyada dhaqaalaha iyo bulshada oo dowladu ay kordhiso dadaalkeeda ku aadan ladagaalanka musuqmaasuqa,kobcinta dhaqaalaha,xoojinta dimuqraadiyada iyo daahfurnaanta, ladagaalanka argagixisada. waa in warbaahinta dalkana lagu dhiiri galiyaa in ay xooga saaraan xooga saaraan

mawduucyada wanaagsan iyo horumarka dalku ku talaabsanayo siloo suuliyo wararka xunxun ee warbaahintu dalka ka faafiso.

h. **Dugsi ma leh qabyaaladi waxay dumiso mooyaane:** Ololahani wuxuu diiradda saarayaa sidii loo suulin lahaa ku dhaqanka qabyaalada. Wuxuu ummada ku jeheynayaa midnimo iyo wax wada qabsi taabo-gal ah.

i. **Diinteena Islaamku waa Nasteexo:** Ololahani wuxuu diirada saarayaa in culimada waawayn ee dalku ay qabtaan isusoo baxyo ay ka jeediyaan muxaadarooyin lagu muujinayo sida diinta islaamku ay utahay nasteexo isla markaana lagu cambaaraynayo fikradaha qaldan ee kooxaha xagjirka ah ku qaldayaan dadka aan waxbadan a fahansanayn diinta Islaamka.

j. **Cadaalad baa ina Wada Deeqda:** Waa in cadaalad darada la diido cadaaladana loo hiiliyo. Waxaana shacbiga la dareensiinayaa dhibaatada cadaalad daradu leedahay iyo inaysan marna raali ka noqon in cadaalad daro lagu sameeyo

k. **Dastuurka Qaran:** Ololahani wuxuu dhiirigelinayaa in shacbku ka qeyb qaato hannaanka dib u eegista dastuurka dalka. Wuxuuna maareynayaa wacyigelinta la xiriirta aftida guud ee lagu meel-marinayo dastuurka federaalka.

l. **Balanteenu waa Wax-soo-Saar:** Horumar dhaqaale lama gaari karo haduusan jirin wax-soo-Saarkii guduhu. Sidaas daraadeed waxaa shacbiga lagu dhiirigelinayaa wax-soo-saarka beeraha, kaluumaysiga iyo warshadaha yaryar. Waana in la dhiirigeliyo lana hago qaabkay dadkeenu ugu dhiiran lahaayeen wax-soo-saarka.

m. **Shaqaa Sharaf leh:** Dadkeena gaar ahaan dhalinyarada waxaa lagu wacyi-gelinayaa qiimaha ayleedahay inuu qofku shaqaysto si uu isku filnaash ugaadho. Waxaana lagama maarmaan ah in dowladu si daahfurnaan ah ay bulshada ugu soo bandhigto fursadaha shaqo iyo ganacsi ee jira.

n. **U hogaansanka Shaciga:** Waxaa dadka la barayaa sharciga dalka waxaana lagu wacyigelinayaa inay ilaaliyaan una hogaansamaan sharciga.

o. **Wax Barta aan Barwaaqo Gaarnee:** Ololahani wuxuu dhiirigelinayaa muhiimada waxbarashada heerarkeeda kala duwan iyo qiimaha nololeed ee ay ugu fadhido qofka, qoyska iyo dalkaba. Wuxuu kaluu meel marinayaa qorshayaasha waxbarashada iyo tacliinta sare ee dawladda.

p. **Bulsho Caafimaad Qabta** Ka hortaga cuduradu wuxuu ka muhiimsan yahay daaweynta. Sidaas daraadeed wuxuu ololahani dhisayaa wacyiga dadka ee ku aadan ka hortaga cudurada dhamaantood gaar ahaan kuwa faafa. Sidoo kale wuxuu ummada ku wacyigelinayaa taxadarka caafimaad ee guud iyo gaar ahaan inta taagta daran ee ay ugu horeeyaan hooyada, dhalaanka iyo waayeelka.

## 9.0. AALADAHA XIRIIRKA (Communication Tools)

Dawladdu waxay adeegsanaysaa dhamaan aaladaha lagu wada xiriir ee suurt gal ah iyo kuwa u baahan maal-gelinta ee lagu gaaro karo shacbiga meel-kasta oo ay joogaan, si qoladaas fariintu u gaarto waa in la qiimeeyaa aalada xiriir ee ugu sahlan ee lagu gaari karo ama ay sida joogtada ah u isticmaalaan. Noocyada lagu gudbinayo fariimaha wacyigelinta waxay kala yihiin:

### 9.1. Qeybaha Warbaahinta:

a. Telefishanada,

b. Idaacadaha,

c. Website-yada,

d. Wargeysyada,

e. Warside

f. Gawaadhi lasaaray cod baahiyeyaal oo bulshada lagu wacyi galiyo

### 9.2. Baraha Bulshada:

**a.** Facebook,

**b.** Twitter,

**c.** Youtube,

**d.** Whatsapp,

**e.** Fariimaha telefoonka (SMS)

**9.3 Kulamo dadweyne:** 21

**a.** Doodo,

**b.** Isu soo bax,

**c.** Shirar bulsho,

**d.** Madal dadweyne

**9.4 Tabeelayaasha/Boostarada Darbiga/Bandhiga qoraalka iyo Farshaxanka**

A.Warqadaha Qoraalka kooban (Handouts) Codbaahiyayaal

## 10.0. DABAGAL & QIIMEYN (Monitoring & Evaulation)

Si joogto ah ayaa waxaa loo qiimeynayaa waxtarka iyo hoos u dhaca soo wajaha hirgelinta istaraatiijiyada ayadoo si gaar ah loo qiimeynayo guulaha iyo waxtarka ololeyaasha gaarka ah.

Wasaaradda warfaafintu waxay sameynaysaa qiimeynta heerka hirgalinta wacyigelintu marayso lixdii biloodba mar iyadoo la kaashaneysa qiimeeyayaal madax banaan hadii duruufta dhaqaale saamaxdo.

**10.1. SALDHIGGA QIIMEYNTA:** Dhowr arrimood ayaa saldhig u noqonaya qimeynta saameynta ololeyaasha wacyigelinta ee la fuliyay.

a. Qiyaasta saameynta ololaha ayadoo la eegayo hadba inta laga guul gaarey ujeedooyinkii laga lahaa ololaha. Waxaana laga diyaarinayaa warbixin buuxda o lagu cabirayo qirada saameynta ee dhabta ah ee uu olole kasta yeeshay.

b. Cabirkaas waxaa laga qadanayaa fariimaha ay dadku ka qabaan ololaha ee ka soo noqotay xogtii shacbiga lala wadaagey mudadii ololuhu socday.

c. Qiimeyn qaas ah (surveys) ayaa lagu sameynayaa saameynta ololayaasha, oo laga soo qaadayo dadka uu ku wajahnaa ololuhu oo wareysiyo gooni ah lala yeelanayo.

d. Shirar gaar ah ayaa la abaabulayaa si loo ogaado loona qiimeeyo saameynta iyo guulaha laga gaarey ololayaasha. Shirarkaan waa inay ka qeyb qaataan dad aqoon iyo khibrad u leh hawlaha wacyigelinta ee socda u bulshda ay quseyso.

e. Waxaa la cabirayaa is baddelka guud ee jira ee uu yeeshay ololuhu marka la eego kororka wacyiga bulshada ee la xariira hawsha qaaska ah ee dawladdu fulinayso ee ololuhu qeybta ka ahaa.

f. Cabirka horumarka guud ee dawladda, kalsoonida shacbiga iyo aminiga iyo doorka ay ku yeesheen ololayaasha wacyigelinta ee arrimahaas la xariira. Qiimeyntani waxay noqoneysaa miday ka qeyb qaataan hawlwadeenada dawladdu ayagoo soo gudbinaya isbedelka ku yimid hawlaha dawladda ee ay masuulka ka yihiin.

## 10.2. NATIIJADA LAGA FILAYO ISTARAATIIJIYADDA

Marka uu dhamaado barnaamijkaan waxaanu filaynaa in la gaaray guulo waawan oo ay ka mid yihiin

a. In la helo dadweyne wacyigashan, oo dawladooda taageersan,

b. Wacyiga dadwaynaha ee ku aadan fahamka fikirka qaldan ee xagjirka oo sare ukacay

c. In ay dadwaynuhu ku dhiiradaan in ay iska qabtaan argagixisada ku dhex dhuumanaysa ugu danbayna ay taasi u diido Shabaab in ay helaan meel ay ku dhuuntaan;

d. In ay joogsato canshuuraha ay ganacsataduna siyaa kooxaha xagjirka ah

e. In ay yaraato ama joogsato ku biirista al-Shabaab ee dhalinyarada.

f. Kooxaha xagjirka ha oolaga sifiiyay dalka oo dhan ama intiisa badan

g. In la soo celiyay Soomaalinimadii iyo isjeceylkii shacabka Soomaaliyeed

h. In rajo lagu abuuray bulshada Soomaaliyeed isla markaana bulshadu yeelato hiigsi nololeed

i. Dadweynaha oo barta nidaamka doorashada.

j. Dadweynaha oo si is-xilqaan ah uga qeybqaata dib u dhiska dalka.

k. Wax soo saarka dalka oo kordha.

l. Tirada dadka waxbarta oo kororta.

## 10.3. LAGAMA MAARMAANKA HIRGALINTA ISTARAATIJIDA

Si ay Wasaaraddu u hirgaliso Istaraatijiyadan, waxay u baahan tahay in ay hesho waxyaalahan soo socda:

- Dhaqaale lagu fuliyo barnaamijyadan, oo ku baxaya adeegyada fuddudaynaya barnaamijyada sida,
- *Gaadiiid*
- *Amni*
- *Isgaarsiin*
- *Dhiirigalin,*
- *Abaabul bulsho,*
- *Cabitaan iyo cunno,*
- *Kiro,*
- *Daabacaad,*
- *Sii baahinta barnaamijyadaan ee warbaahinta gaarka ah, iyo wixii la mid ah.*

## 11.0 GUNAANAD

Sida ku cad istaraatiijiyadan, yoolka wasaaraddu waa in meel la isugu keeno aragtida shacbiga Soomaaliyeed, laguna jiheeyo dariiq midnimo, oo mar kale noo saamaxa dowladnimo taam ah. Sidaas daraadeed, waxay wasaaraddu waydiisanaysaa hey'adaha kala duwan ee qaranka in ay ku garabsiiyaan hirgelinta Istaraatiijiyadda Wacyigalinta Qaranka.

**DHAMAAD**